SOMALI

## BUUXITAANKA WAQADDA AMARKA DHOWRITAANKA

Waxaa lagu codsadaa warqad aad ka heleysid **oikeus.fi**-pageka.Muhiim waaye in sifiican loo buuxiyo. Saacidaad waxaa ka codsankartaa lawyarkaaga ama Taageraha dhibanaha oo lacagla'aan kuugu saacidaayo kuuna raacaayo maxkamadda.

Wey fiicantahey intaa arimahaan ku sheegtit codsigaaga.

- Maxaa dhacey yaana ku dhibooyo ama ku silcinooyo?
- Dhibkaan suu kula yahey mana wadmaa wax badan?
- Ilaaiyo meeqo goor ayaa lugula soo xiriirey ama lagu jirxumeeyey?
- Booliiska ma bandhigtey ama ma sameysey warbixin?
- Thakhtar ma u tagtey?
- Waxyaabo kale ma sameysey see u dhamaato dhibka?
- Qof marqaati ah maheysataa?
- Ilmahaada oo 18 sano ka yar arinta mey ku jiraan?
- Ma u maleysaa intey arintaan iyo dhibkaan sii wadmaayo.
- Arintaan sey noloshaada u bedeshey - wax ma qabsankartaa oo noloshaada caadiga ku saabsan
- Hadii aad dalbaneysid dhowritaanka amarka oo la weynaayey intaa sheegtit waaye meelyaasha aad ku dareemeysid amaangalyodarro.
- Kiligaada maa dhowritaan rabtit mise ilmahana waad u rabtaa?

Waxaa fiican intaa cadeyn keentit sida oo ah

- Takthtarka cadeyn uu kuu gorey ama warbixinta kulankiina
- sooshalka warqadaha ey kuu qoreen
- emailka, boostida iyo messageyaashaa aa isku dirteen
- telefoonyaasha aad ka jawaabtey iyo saacadaha lagu soo wacey
- marqaatiyaasha sida deriska ama dadka aad isla shaqeysiin waxey arkeen ama maqleen

## SAACIDAAD KUSAABSAN TAAGERAHA DHIBANAHA IYO AMARKA DHOWRITAANKA

## TELEFOON KU SAACIDAAYO 116 006

RIKU wuxuu xafiis ku heestaa 7 magaalo iyo 31 hafiis. Adeeg kasto iyo maclumaad waxaad ka heleysaa

➔ **riku.fi**

RIKU waxey saacidaan dembiga dhibanihiisa, dadka u dhow iyo marqaatiga. Lacagla'aan ey ku saacidaan Finland oo dhan.



/rikosuhripaivystys @rikosuhrit

Shaqadeena waxaa nagu saacido:saacid:

RIKU
RIKOSUHRIPÄIVYSTYS
VICTIM SUPPORT FINLAND

MINISTRY OF JUSTICE
FINLAND

# DHOWRITAANKA AMARKA IYO SIDAA U DALBANEYSID

**Haga taageeraha dhibanaha** ● **6** (2019)

RIKU
RIKOSUHRIPÄIVYSTYS
VICTIM SUPPORT FINLAND

Dhowritaanka amarka waxaa dhalbankaro qof kasta oo rabo intaa la dhowro naftiisa, caafimaadkiisa iyo xoriyaddiisa. Gofkii amarkaas loo dhiibo mar dhambey uma soo dhowaankaro lamana soo hadlikaro qofka laga ilaalinaayo.

Gofka wuu la xiriirikaraa qofka kale hadey wax muhiim ah jiraan sida haduu canug hanuusto. Dhowritaanka amaanka waxey jireysaa ugu badni hal sano iyo familka gudihiisana ugu badni seddax bilood. Hadii loo baahanyahey waa la sii dheereenkaraa saacadahaan.

## AMARKA LACAGAHA KU BAXAAYO

Dalbashida amarkaan waxawaaye 260 (sanadka 2019) hadii lasoo ogolaanin. Dadka dowladda ka bixineyso garyaqaanka waxna lagama qaadaayo.

Qofka dalbanaayo wuxuu isticmaalikaraa lawyar ama garyaqaan loo dhiibey ogolaansho intuu maxkamad ka hadlo asigaana baxsanaayo garyaqaanka lacagtiisa. Dowladda lawyaryaasheeda qofka wuxuu lacagla'aan ku isticmaalikaraa markuu daqliga soo galaayo uu yaryahey. Qofkasta xaaladdiisa ayaa la qiyaasaayaa.

## DALBASHIDA DHOWRITAANKA AMAANKA

Dhowritaanka amaanka waxaa laga dhalbanaayaa maxkamada ugubadnina waxey qaadaneysaa door isbuuc intaa laga soo jawaabo. Marmar booliiska wuxuu wareysankaraa gofka markuu dalbanaayo dhowritaanka amaanka inteynan arinta aadin maxkamada ka hor. Xawaa dicikarto intuu booliiska diibo amar oo gofka loo soo dhawaankarin illaa ey maxkamadda ka deceyso. Laakin tan wa kumeelgaar.

Dhowrtikaanka amaanka wuxuu ahaankaraa mid oo normal ah, mid la weyneye iyo mid familka gudhihiisa ah.

- Kan normalka ah gofka amarka loo dhiibey lama hadlikaro ama raadsankaro gofka laga ilaalinaayo. Ma isku dayikaro intuu gofka kale intuu ilaaliyo ama dabagalo
- Kan la weyneeye waxaa la dhiidaayaa inta gofka la ilaalinaayo gurigiisa ama shaqadiisa loo soo dhawaado. Kan wey fiicantahey intaa laga fekero hadaanan gofka gurigiisa ciwaankeeda la ogeyn.
- Familka gudeheeda hadii gof loo dhiibo amarka dhowritaanka, gofka kale intuu ka guuro waaye haduu xataa leeyahey guriga. Maxkamadda waxey dhiibikartaa kan haduu gofka kale noloshiisha, nabadiisa ama xoriyaddiisa wax u dhibaayo laakiin dhib caadi ah loogama dhiibaayo amarkaan.

## DHOWRITAANKA AMAANKA MAXKAMADA

Arintaan waxaa goaan ka gaaraayo maxkamadda. Maxkamadda waxey magleysaa dadka dalbanaayo, dadka loo dalbaayo iyo marqaatiyaashooda.

Amarka waxaa la dhiibikaraa markaa xaaladda la fiiriyo, gofka daleenkiisa la dhegeysto. la'aqriyo warqadaha marqaatiga lagu furaayo iyo marqaatiyaasha la dhegeysto. Haduu dagaal dhoco markasta toos uma heleysid amarkaan laakiin dhibka haduu sii wadmo oo qofka markasta ku raadinaayo, markaas waad helikartaa amar oonan laguu soo dhawaankarin. Gofka amar waa loo dhiibikaraa haduusan amaanin xataa.

Amarka dhowritaanka wuxyy hirgalaayaa isla markii uu soo boxo. Gofkana dembi wuxuu oga amaanaayaa haduu jibiyo markii oo loosoo sheego amarkaan intuu soo baxey. Gofka la'ilaalinaayo xataa mala xiriirikaro qofka kaley. Labada qof kuma hishiinkaraan intey jibiyaan amarka. Intey ka codsadhaan waaye maxkamadda ogolaansho.

## QOFKA MARKUU JIBIYO AMARKA DHOWRITAANKA

Qofkasta oo la dhowraayo booliska wuu la socdaa. Hadii laguu soo dhowaado, booliiska intaa u sheegtit waaye. Booliiska haduu amaado, gofka uu amarka quseeyo waala bexinaa. Amarka hadaa la jibiyo, waxawaaye dembi. Dembigaas waxaa laga helikaraa ganaax ama ugu badni labo sano oo xarig ah.

RIKU
RIKOSUHRIPÄIVYSTYS
VICTIM SUPPORT FINLAND